

Ururka tufaaxa

Ururka tufaaxa waa nidaam kaalmo dhaqaale oo degmadu bixiso kaas oo u suurtoogelin doona carruurta iyo dhallinyardu inay ka qaybqaataan waxqabadyada xilliga firaaqada, xitaa haddii qoysku leeyahay dakhli yar.

Ururka ayaa u codsada tageerada dhaqaale carruurta.

Haddii aya adag tahay in ururka ama naadiga lagala hadlo dhaqaalaha, waxaad la xiriiri kartaa la taliyaha wakhtiga firaaqada oo ku caawin kara.

Ururka tufaaxa wuxuu kaliya tageeri karaa hal waxqabad sannadkii halkii cunugba, waxaadna heli kartaa tageero kaliya inta ay jirto baahi dhab ah oo loo qabo.

Dad badan ayaa codsada taageero, mar walbana suurtagal ma ahan in laga caawiyo biilka oo dhan. Kala hadal ururka ama qof ku jira ururka tufaaxa wixii ku saabsan xalal kala duwan haddii waxqabadku noqda mid qaali ah.

Halkaan waxaad ka akhrin kartaa wax badan oo ku saabsan ururka tufaaxa oo dhowr luqadood ah:

<https://lieropplevelser.no/opplevelser/the-apple-fund/>

Xiriirka iyo su'aalaha: eplefondet@lier.kommune.no / telefon: 32220250

Hagida wakhtiga firaaqada

La-taliyaha xilliga firaaqada wuxuu caawin karaa carruurta iyo dhallinyarada ay ku adag tahay inay galaan waxqabadyada firaaqada. La-taliyaha xilliga firaaqada ayaa dulmar wanaagsan ka leh barnaamijyada firaaqada ee carruurta iyo dhallinyarada. Waxaan si wadajir ah uga hadalnaa waxaad jeceshahay inaad sameyso iskuulka ka dib iyo waxa ay qaadnayso si aad ugu biirto waxqabadyada xilliga firaaqada.

La-taliyaha xilliga firaaqada wuxuu la hadli karaa tababaryasha ama macalimiinta wuxuuna samayn karaa heshiishyo ka dhigaya mid ammaan ah oo farxad leh in la yimaado kulanka tababarka ama kulanka ugu horreeya.

La-taliyaha wakhtiga firaaqada waxa kale oo uu ku hagi karaa waalidka waxa ay ka dhigan tahay in caruur la gaysto waxqabadyada firaaqada, si aay ugu fududato inay caawimo dalbadaan haddii ay jirto wax kugo adag ama aad su'aalo ka qabto.

Xitaa waxaad heli kartoo turjubaan xilliga waxqabadka firaaqada.

La xiriir la-taliyaha wakhtiga firaaqada: fritidsveiledning@lier.kommune.no

Mobil: 95526382 (svarer også på sms)



EPLEFONDET
FRITID FOR ALLE

